



Tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19 hadda waa u diyaar qofkasta oo jira 5 iyo wixii ka weyn.

Tallaallada COVID-19 waa ammaan weyna waxtar badan yihiin. Dhammaan tallaallada COVID-19 waa in maraan baaritaan iyo dib-u-fiirin adag. FDA waxay u oggolaatay tallaalka Pfizer isticmaalka amarjansiga ee loogu talagalay da'ooyinka 5 iyo qofkii ka weyn mana helin wax walaacyo halis ah oo badqab/ammaan. Khabiirro madaxbannaan ayaa xaqiijiyay tallaalku inuu daboolo sharuudaha sare ee ammaanka iyo waxtarnimada.

Tallaallada COVID-19 waa bilaash waana diyaar ayadoon la eegeyn ceymis caafimaad, sharci-hayso, ama xaalad imigareyshin/socdaal. Adeeg-bixiyahaagu lacag kaagama qaadi karo booqasho xaafiis haddii aad u aado keliya tallaalka inaad hesho.

SIDA TALLAALKA LOO HELO



Hel goob tallaalka

- Ka fiiri **meelaha tallaalka ee King County** (in badan uma baahna ballamo) boggaan kingcounty.gov/vaccine (ka xulo luuqad bogga dhamaadkiisa)
- **Wac xaafiiska dhaqtarkaaga ama adeeg-bixiyahaaga daryeel-caafimaadka** si aad u ogaatid inay hayaan doorashooyin tallaalka oo diyaar ah.
- **Farmashiyada iyo goobaha kale ee tallaalka** ku raadi zip code adoo isticmaalaya vaccinelocator.doh.wa.gov (ka dooro luuqadda liiska ku jira menu-ga geeska kore ee midig)
- **Ma u baahantahay caawin telefoonka ah?** Ka wac 206-477-3977 Xarunta Wicitaanka COVID-19 ee King County COVID-19 inta u dhexeysa 8 AM – 7 PM. Turjumaanno waa diyaar – sheeg afkaad u baahantahay markii lagaa qabto.



Waxa la keeno ballantaada tallaalka:

- **Wax caddeynaya da'da:** aqoonsi/ID kasoo baxay gobolka, qabiilka ama dowladda federaalka, shahaado dhalasho, aqoonsi dugsi ama warqad caafimaad oo magac iyo taariikh dhalasho leh waa la isticmaali karaa.
- **Oggolaansho tallaalka.** Waxaa laga yaabaa inaad u baahato foom oggolaansho oo ka yimaada waalid ama qof weyn oo kale oo la-oggolaaday si aad u heshid tallaalka COVID-19. Dhallinyaradu naftooda wey u oggolaan karaan haddii ay madaxbannaan yihiin, ay is-qabaan qof weyn oo qaangaar ah, ama goobta tallaalku go'aamiyo inay [ilmo qaangaar](https://kingcounty.gov/vaccine/youth) ah yihiin (Ingiriis keliya). Wax badan ka ogow sharuudaha tallaalka kingcounty.gov/vaccine/youth (ka dooro luuqadda liiska ku jira menu-ga geeska kore ee midig).
- **Soo xiro gacmo-gaab** ama gacmo-dheere si fudud kor loogu laabi karo.
- **Wax la sameeyo inta aad sugaysid.**

SU'AALO MA QABTAA? Eeg FAQ (su'aalaha inta badan la isweydiyo) ee bogga ku xiga ama aad kingcounty.gov/covid/vaccine (ka dooro luuqadda liiska ku jira menu-ga geeska kore ee midig)

SU'AALAHHA INTA BADAN LA ISWEYDIYO EE KU SAABSAN TALLAALLADA:

Imisa irbadood baan u baahanahay si aan si buuxda ugu tallaalnaado?

Waxaa u baahan doontaa labo irbadood ee tallaalka Pfizer. Waxaad heli doontaa irbad labaad ugu yaraan 21 beri kadib tan koowaad. Irbadda koobaad waxay bilowdaa dhisidda difaacaaga COVID-19 irbadda labaadna waxay sare u qaadaa oo dhameystirtaa difaacaas. Si buuxda ayaad u tallaalantahay markii 2 isbuuc kasoo wareegto irbaddaada labaad.

Tan ma isla tallaalka dadka waaweyn qaataan baa?

Dhallinyarada 12-17 waxay qaataan tallaalka Pfizer ee dadka waaweyn qaataan. Caruurta 5-12 sano jira waxay qaataan irbad Pfizer ah oo da'yartaas loo sameeyay (da'da 5-11). Dadka 18 sano jira ama ka weyn waxay sidookale qaadan karaan tallaallada Moderna ama Johnson & Johnson, laakiin tallaalladaas weli looma oggolaan da'yarta.

Waxyeello (side effects) ma ka qaadi doonaa?

Waxaa laga yaabaa inaad isku aragto waxyeelooyinka sida gacan xanuun, qandho, madax-xanuun, ama inaad dareento daal ilaa dhawr beri kadib markaad tallaalka qaadatid. Kuwaan waa calaamado caadi ah oo ah jirkaagu hab-dhiska difaaca inuu dhisayo. Dadka qaar gebi-ahaanba wax waxyeello ah ma qaadaan.

Tallaalka ma ka qaadi karaa COVID-19?

Maya. Majiraan wax feyraska karoona ah oo ku jira tallaalka mana ka qaadi kartid COVID-19.

Maxaan sameyn karaa markaan si buuxda u tallaalanahay?

Waxaad markale bilaabi kartaa waxyaalo badan oo istaagay maxaayeelay cudurka safmarka! Waxaad gudaha la joogi kartaa dadka si buuxda u tallaalan adigoon xiran maaskaro (waxaan ka ahayn meelaha dadweynaha ama dad badan kujiraan). Uma baahnid inaad ku xirato maaskaro bannaanka waxaan ka ahayn meelaha dadku ka buuxo. La soco akhbaaraadka ugu dambeeya ee ku saabsan waxa aad sameyn kartid markaad tallaalka qaadatid:

[LifeAfterVaccine.org](https://www.lifeaftervaccine.org)(ka doora luuqadda menu-ga kore)

Af-xirasho la'aan ma la joogi karaa dadka aan tallaalneyn?

Kadib markaad tallaalka si buuxda u qaadato, waxaad maaskaro la'aan gudaha la joogi kartaa dadka aan tallaalneyn ee hal guri ku wadanoool haday khatar yar ugu jiraan COVID-19 (tusaale, qof ka mid ah uusan lahayn dhibaatooyin caafimaad). Haddii ay yihiin dad ka kala yimid hal guri wax ka badan ama qof ka mid ah khatar sare leeyahay, waa inaad maaskaro xirato, 6 taako isku jirsataan, oo la joogo meel hawo-wareeg fiican leh (sida bannaanka ama meel daaqaaduhu u furanyihiin). Tallaalku si fiican buu adiga kuu difaaca, laakiin khabiirradu waxay weli baranayan in dadka tallaalan feyraska u gudbin karaan dadka aan tallaalneyn.

Xaggee baan u aadi karaa su'aalaha tallaalka ee aan qabo ama qoyskeyga?

Dhaqtarkaaga ama adeeg-bixiyaha daryeel-caafimaadkaaga ayaa marwalba ah qofka ugu fiican in aad weydiiso. Sidookale waxaad su'aalo badan jawaabtooda ka heli kartaa [kingcounty.gov/covid/vaccine](https://www.kingcounty.gov/covid/vaccine)(ka dooro luuqadda liiska ku jira menu-ga geeska kore ee midig).